

WARBIXIN KU SAABSAN BAARITAANKAA COVID-19

Waxaanu ku weydiinaynaa sawir aqoonsi ahaan si lo xaqiijiyo in aan hayno macluumaadka saxda:

Kaadhka Medicare, liisanka, baasaboortu iyo concession kaadhka.

Baaristu waa degdeg, amaan, waana sahal. Kalkaalisada caafimaadka ayaa cudbi kaga qaadaysa sambal sanakaaga iyo cunahaaga.

Marka baaritaanka la qaado, waxaa loo diraa Dorevitch Pathology si loo baaro. Waxaad kuheli doontaa natiijada baaritaankaaga fariin qoraal ah oo ka timid Dorevitch Pathology

Waxaanu kuugu sheegi doonaa natiijada sida ugu dhaqsaha badan oo aan awoodno. Caadi ahaan waxay qaadataa 2-3 maalmood si loo helo natiijooyinka baaritaanka ka dib.

Haddii aadan helin natiijadaada maalinta saddexaad, fadlan la xiriir Banyule Community Health taleefanka 9450 2000.

Shahaadada imaanshaha waxaa la bixin karaa waqtiga baaritaanka lagaa qaadayo. Fadlan la hadal xirfadlaha caafimaadka ee baaritaankaaga sameynaya

www.dhhs.vic.gov.au/coronavirus

Coronavirus hotline

1800 675 398

(24 hours, 7 days a week)



**Banyule
Community
Health**

www.bchs.org.au

MACLUUMAAD KU SAABSAN KARANTIIL

Maxaan sameeyaa ka dib baaritaanka haddii aan qabo astaamo?

Isla markiiba guriga u tag baaritaanka ka dib.
Waa inaad kaligaa ku ahaataa guriga illaa aad ka ogaato natiijooyinka baaritaankaaga.

Maxaan sameeyaa haddii aan u baahanahay in lay baaro qalliinka ka hor?

Isla markiiba guriga u tag baaritaanka ka dib oo go'doomiso ilaa qalliinka lagugu sameynayo.

Maxaan sameeyaa haddii aan warqad ka helo ama aan la soo xiriiro Department of Human Services (DHHS) si la ii baaro?

Waa inaad guriga tagtaa oo go'doomisaa 14 maalmood laga bilaabo waqtigan aad heshay ogeysiis

Ka waran haddii aan iska helo cudurka?

Haddii aad isku aragto wax togan, waa inaad sii wadataa go'doomintaada. Waxaa kula soo xiriiri doona shaqaale caafimaad oo ka socda Department of Health and Human Services (DHHS) si aad uga hesho talo ku saabsan tallaabooyinka xiga

